

**Suaal:**

**Hadii ay Ciid-Al Fitr ama Al Adxaa ay ku beegmaan maalinta jimce, Maxaa la samaynayaa? Ma Duhr baan tukanaa hadii aananu tukan salaada jimce, mise wax na saaran ma jiro hadii aananu tukan salaada jimcaha?**

**Jawaab:**

Qofkii tukada salaada ciida maalinta jimcaha waxaa u banaan in uuna salaada jimce tukan maalintaas, imaamka isaga waaku waajib si ay dadkii rabay in ay tukadaan salaada jimcaha u yimaadaan xataa kuwii tukaday salaadii ciidaba ha ahaadaan eh, ama kuwii aan salaada ciida aan tagin. Hadii ayna cidna iman salaada jimcaha imaamka waxba ma saarna markaas waxaa ku waajib ah in uu salaada duhr iska tukado. Culimadu waxay uga daliishadeen Xadiithka ku jira Abu Daawuud sunankiisa, oo u ka wariyay Iyyaas bin Abi Ramlah Ash-Shami, oo yidhi: Waxaan arkay Mucaawiyyah bin Abi Sufyan (ilaahay raali ha ka noqdee) oo waydiinaya Zayd bin Arqam miyaad la kulan tay laba ciid oo maalin kaliya dhacday xaal aad rasuulka ilaahay la joogteen? Wuxuu yidhi: Haa. Wuxuu waydiiyay: “Muxuu sameeyay? Wuxuu ku jawaabay : wuxuu tujuyay salaadii ciida, dabadeetana wuxuu u kula bandhigay saxaabadii kii rabay in ay tukadaan salaadii jimce, isagoo leh : qofkii raba in uu tukado ha tukado. (Abu Daawuud no. 1070)

Waxaa kale oo ay ka daliishadeen culimadu Xadiithka ku jira Abu Dawuud sunnankiisa oo u ka wariyay Abu Hurayra (ilaahay raali ha ka noqdee) in uu yidhi Rasuulku (Amaan iyo Nabad Galyo Korkiisa ha ahaatee) Laba ciid ayaa manta dhacday, markaas qofkii tukada salaadii ciida tii jimce waajib kuguma aha, Anakuna waanu tukanaynaa salaada jimce. (Abu Dawuud no 1074)

Taasi waxay daliil u tahay in ay banaan tahay kuwii tukada salaada ciida in ay ka tagi karaan salaada jimce, laakiin imaamku cudur daar maleh, waayo Rasuulka (amaan iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee) in uu yidhi: “Anaku waanu tukanaynaa salaada jimce.”

Waxaa kale oo ay ka daliishadaan culimadu Xadiithka uu Muslim Soo saaray, oo u ka wariyay Nucmaan Bin Bashiir, (ilaahay raali ha ka noqdee) Nabigu (amaan iyo nabad galyo kor kiisa ha ahaatee) wuxuu akhrin jiray suurada Al-Aclaa iyo Surada Al-Ghaashiyyah salaadaha Ciida iyo Jimcaha, waxaana laga yaabaa in uu tukaday labada salaadood maalin kaliya isagoo akhrinaya suuradahaas. (Muslim no 878) Markaas qofkii aan tagin salaada jimce ee tukaday salaadii ciida waxaa ku waajib ah in uu tukado salaadii duhr. Nusuustuna waxay tusaysaa in ay waajib tahay salaada duhr kuwa aan tagin salaada Jimce.

Amaan iyo Nabad Galyo Korkiisa Ha Ahaato Nabigeena, Muxammad iyo Ehelkiisa iyo Saxaabadiisa.

اللجنة الدائمة للبحوث العلمية والإفتاء

*al-Lajnah ad-Daa'imah lil-Buxooth al-Cilmiyyah wal-Iftaa*

Fatawa Islamiyah Vol. 2 Pgs 453-454

Waxaa Turjumay: Abu Caaisha Aadam ibn Ali